

## Qorshaha Kala Guurka ah ee loogu tala galay Ardayda leh Baahiyaha Waxbarashada ee Gaarka ah *Macluumaadka Waalidka/Mas'uulka*

### Waa maxay qorshe kala guur ah?

- Waa qorshe la isku duba riday lana faahfaahiyay oo loo diyaariiyay in uu canuggaaga ka caawiyo u kala gudbidda waxbarashada si guul ah.
- Qorshuhu wuxuu qayb muhiim ah ka yahay Qorshaha Waxbarashada Gaarka ah ee canugga (IEP) waxaana kamid noqon kara tallaabooyin maalinle ah, ama kuwo muddo gaaban, iyo muddo dheerba ah.
- Qorshaynta u kala wareegidda waxbarashadu waxay ka bilaabanaysaa marka ardaygu soo galoo dugsiga waxayna sii soconaysaa inta uu iskuulka ku jiro ilaa ardaygu dugsiga ka baxayo.

### Ma ogtahay?

- Waxaa jira kala wareegidyo kala duwan oo canuggaagu mari karo. U kala wareegidda waxaa kamid ah:
  - soo galista dugsiga
  - fasalada dhexdooda
  - ka wareegidda dugsiga hoose ayada oo uu u wareegayo dugsiga sare
  - ka wareegidda dugsiga sare asaga oo u wareegaya waxbarashada dugsiga sare ka danbaysa
  - kusoo laabashada dugsiga kaddib marka uu muddo dheer ka maqnaado sababo caafimaad ama marka uu ka helo daryeel, daaweyn, awgood, ama baxnaanin hay'ad kale
  - inta u dhexaysa howlaha iyo goobaha
  - asaga oo ka wareegaya fasalada caadiga ah una wareegaya meelawayga taageerada gaarka ah uu ka helaayo
- Qorshaha u kala wareegidda waxaa la diyaarinayaa ayada oo lala shaqaynayo adiga, canuggaaga, shaqaalahu dugsiga, mararka qaarna waxaa ku lug yeelan kara hay'adaha bulshada iyo saaxiibada ka shaqeeya howlaha markii ardaygu dugsiga sare dhammaysto.
- Qorshaha kala guurka ah waa in loo diyaariyaa dhammaan ardayda leh Qorshaha Waxbarashada Gaarka ah (IEP) haddii ay ku tiriyaa iyo haddii aysan ku tirinba xaaladiisa mid gaar ah Guddiga Dib u eegista, Meelaynta iyo Aqoonsigu (IPRC).

### Waa maxay kaalintaadu?

- La wadaag shaqaalahu dugsiga macluumaadka khuseeya ee gacanta ka gaysanaya u kala wareegidda waxbarashada canuggaaga. Macluumaadka waxaa kamid noqon kara istiraatiijiyadooyin guul leh ama kaalmo ka imaanaysa hay'adaha bulshada.
- Ka qaybgal kulamada IEP ee canuggaaga waxaadna ku darsataa ra'yigaaga qorshaha kala guurka.

- Kala shaqee shaqaalaha dugsiga diyaarinta iyo kaalmada canuggaaga inta lagu jiro u kala wareegidaha.
- Weydii macalinka canuggaaga haddii aad qabto wax su'aal ah oo ku saabsan qorshaha kala guurka ee canuggaaga.

Fadlan u tixraac Taxaneyaasha Muuqaalada ah ee Macluumaadka Adeegga Khaaska ah ee HWDSB si aad u hesho macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan mowduucyada la xiriira waxbarashada gaarka ah, oo ay kamid yihiin qorsheyaasha kalaguurka.

**Wax badan ka ogow halkaan [www.hwdsb.on.ca/about/special-education](http://www.hwdsb.on.ca/about/special-education)**